


Ma ogtahay in **Qashinka Halista ah** aan lagu dari karin qashinka ama aan lagu shubi karin dhuumaha biyaha qashinka qaada?



Haddii shaygu leeyahay calaamad leh hal ama in ka badan oo **ereyadan ah** waa Qashinka Halista badan leh!



Meheraddaadu waxay heli kartaa qashin-qaadis lacag la'aan ah ilaa afar jeer sannadkii haddii aad u qalanto. Si ganacsiga uu ugu qalmo arrintaas, ganacsigaagu waa inuu ku yaalaa Degmada King County, waa inuu yahay mid soo saara wax ka yar 220 rodol oo qashinka halista ah bishii iyo waa inuu ahaadaa mid kaydiya wax ka yar 2,200 rodol oo Qashinka Halista ah sanadkii. Ganacsiyada u qalma waxay samayn karaan *ilaa 4 booqashooyin sanadkii*. Xadka rarka waa *25 gaalon ama 220 rodol booqasho kasta*. Buuxi Foomka Qashin-Qaadista Ganacsiga ee ku jira websaydkeena kahor intaadan qashinka keenin.

Booqo xarunta ururinta qashinka khatarta ah oo mid ka mid ah afar goobood



NORTH SEATTLE
12550 Stone Ave N
Seattle, WA 98133.

Furan: 9a-5p Axad.-Talaado.



SOUTH SEATTLE
8100 2nd Ave S
Seattle, WA 98108

Furan: 9a-5p Khamiis.-Sabti.
Waxay ku taalaa ka soo horjeedka xarunta wareejinta



FACTORIA
13800 SE 32nd St
Bellevue, WA 98005

Furan: 8a-4p Talaado.-Jimco.
iyo 9a-5p Sabti.-Axad.
ku yaala goobta wareejinta



AUBURN
1101 Outlet
Collection Way
Auburn, WA 98001

Furan: 10a-5p Sabti.-Axad.
Furan sanadka oo dhan
Waxay ku taalaa meel u dhow meesha qeybta raritaanka maraakiibta ee Nordstrom Rack

TALOYINKA GAADIIDKA







- Weligaa ha isku darin qashinka noocyadiisa kala duwan.
- Qashinka ha ku jiro weelkiisa asalka ah ama weel si habboon u calaamadsan.
- Sheeyada xir oo u dhig si toosan adigoo gelinaya baakad lagu qaadi karo oo qubi karin adigoo ku dahaaraya joornaal ama shay dhecaanka nuugi kara.

kingcountyhazwasteWA.gov











Waa la oggolyahay

*waxaa laga eegayaa miisaanka iyo tirada xaddidan



Si aad u hesho liiska dhamaystiran ee sheegyada iyo xadka tirada, booqo kingcountyhaz-wasteWA.gov ama wac Khadka Caawimaada Wasakhda Khatarta Badan 206-296-4692.

Lama oggola



Muhiim: Kiimikooyinka shaybaarka, beeroksaydhyada orgaaniga ah, iyo wasakhda aadka u khatarta badan ama aan caadiga ahayn waxay u baahan yihiin oggolaansho hore.

Fadlan wac **Khadka Qashinka Halista ah** adigoo isticmaalaya lambarka 206-296-4692.